



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

QARAAR GOLAHA SHACABKA
KU SAABSAN

ANSIXINTA XUBNAHA GUDDIGA MADAXA-BANNAAN EE
DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA

Muqdisho, 19 Juun 2014

A handwritten signature in black ink, appearing to be the name of the speaker or a representative of the House of Representatives.

GOLAHA SHACABKA:

Markuu Arkey: Soojeedinta R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Lam. XRW/GB/00.945/05/14 kuna taariikhsan 29/05/2014 oo Golaha soo gaartay 03/06/2014 kuna saabsan codsi Ansixinta Xubnaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka iyo soojeedinta Wasiirka Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka Lam. WCD/XW/00065/14 ee 29/05/2014 kuna saabsan isla ujeeddada kor ku xusan;

Markuu Arkey: Sharciga Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka Lam. 119 ee 7da Agoosto 2013;

Markuu Ka baaraandegay: Taariikh nololeedka xubnaha magacaabistooda loo soojeediyey in ay ka mid noqdaan Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka;

Asaga oo ku kulansan: Kalfadhiga 4-aad kulankiisa 39-aad ee 19 Juun 2014:

Qodobka 1aad:

Iyada oo ay goob joog yihiin 153 Xildhibaan oo codeenayey wuxuu xubnaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka halkan hoose ku xusan ku Ansixiyey 134 cod oo Oggol ah, 9 diidey iyo 10 Xildhibaan oo ka Aamustay:

- | | |
|---------------------------------------|-------|
| 1. Marwo Caasho Geelle Diiriye | Xubin |
| 2. M.ne Prof. Xasan Cumar Mahadalleh | Xubin |
| 3. M.ne Cusmaan Jaamac Cali "Kalluun" | Xubin |
| 4. M.ne Avv. Maxamed Cabdalla Saalax | Xubin |
| 5. M.ne Avv. Xasan Xuseen Xaaji | Xubin |

Qodobka 2aad:

Waxaa Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laga codsanayaa in uu go'aanka Golaha ku oggolaado Xeer Madaxweyne kuna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Jumhuuriyadda Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 90 (f) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya oo sida ku meel-gaarka loo ansixiyey.


M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaab"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

